Kartidii UDUB ,
KULMIYE ma dareemay?

Mareegta Farshaxan
Diisamber 22,2011

"Weger; Xakamahaaba dhac; Adeer; lexejeclo Cali Xoor-xoor loo qabaa ma jirtee qoladii KULMIYE ayaa arrinkoodu noqday 'Xeradayadu waa wada ul oo ul laqaatana malaha.' Markaa madaxweynuhu inuu dawladdii hore ee uu xafiiska kala wareegay u qayshado xaq buu u leeyahay. Ta kale Ina Xaashi iyo Ina Xoor-xoor waxay kala yeelaan bal hala eego". Dhanxiir Thu 22nd Dec,2011

Dhimashadii Kim Jong II ayaa dad fara badan oo dhashay dalkaa Woqooyiga Kuuriya ku farxeen, saadaaliyeena in isbadal dhici doono.Dadkani waxay fursad u heleen inay dalka dibada uga baxaan ama dareemaan hagardaamada Kim.Hase yeeshee muuqaalada iyo wararka laga soo gudbinayo dadka dalkaa dhex jooga ayaa sidaa ka duwanaa. Waxaa la arkayey iyagoo oohin iyo calaacal la fadhiistay meel kasta oo sawirkii Kim Jong Il sudhan yahay .Marmarka qaarkood waxaad arkeysay iyagoo jidh dil isku samaynaya cadho darteed si ay u muujiyaan ka xumaanshaha geerida.Iyadoo aduunku taa la yaabanaa ayaa dhawaan magaalada Berbera oo in badan ka nasatey maqalka erayga "musuqmaasuq" dib loogu soo magacaabey Engineer Cali Xoor Xoor. Horumar la'aanta magaalada Berbera ayaa loo tiring jiray inay aheyd maamul xumo iyo koox sida lagu tilmaami jiray ahaa qawleysato uu madax u ahaa Cali Xoor Xoor.

Dadkii cunaha loo qoyn waayey, shaxaadkay u barteena heli waayey ayaa gawaadhi qaatey si ay u soo galbiyaan Cali Xoor Xoor.Mudadii Cali Xoor xoor ka maqnaa maamulka Dekada waxaa yaraatey dhibtii lagala kulmi jiray labada walaalaha. Labadaasi waa Maxamud jibriil(afkaan kaa laadi) oo ah madaxa turba taariyada ama ciidanka dekeda iyo C/raxmaan Jibriil(debadaan kaa laadi) oo ah maamulka cashuuraha bariga Berbera.

Hantida ka soo xerootay dakada iyo horumarka laga dareemay magaalada Berbera ayaa ka dhigay Berbera inay noqotay hormoodka dalka Soomaliland.Maalin walba waagu wuxuu baryaa Berberaa wado cusub dhisatey,Berberaa waxaa qabsatey.Madax badan oo xukuma degmooyinka dalka ayaa tilmaan iyo tusaaleba u soo qaata magaalada Berbera. Waydiinta u baahan warcelintu waxay tahay : Maxaa keenay badalka maareeyaha dekada ee gargaar looga dalbadey talada Madaxweyne Riyaale ee la diidanaa?

Xisbiga Kulmiye ayaa aad uga qayliyey dakhliga dekada Berbera ee toos ugu xeroonaya madaxtooyada.Arintani waxay Kulmiye sabab uga dhigeen in madaxweynihii xilligaa ee mudane Daahir Riyaale Kaahin uu doonayo inay hantidaasi gacantiisa soo gasho.Bishii July 27,2010 ayaa Axmed Maxamuud Siilaayo la wareegay maamulka xukuumada. Waxay unkeen shaqaale tiro beelay oo sita magacda la taliyaha madaxweynaha, agaasimaha qurbo jooga, iyo kuwo kale.Dhaqaalihii wuxuu ku hoyday khasnada dawlada. Maalmihii xiisaha (Honey Moon) ayaa dhamaadey. Dhaqaale badan oo la burburiyo oo madaxtooyada soo galaa ma jiro. Waxaa meesha ka dhacdey faro dufan leh aynu isla soo hor fadhiisano oo go'aan lagu gaadhey.

Sidaa darteed ayuu madaxweyne Axmed Maxamed "Siilaanyo" wareegto soo saarey gudbinaysa amarka ah in dakhliga dekada Berbera uu si toos ah u hoos tago madaxtooyada. Wasiirkii wasaarada kaluumaysiga ayaa shaqadiisii ku waayey arintaa markuu u arkey gef.Hase yeeshee waxaa taageero laxaad leh ka bixiyey arintaa isla

markiiba Cali Xoorxoor oo ahaan jiray maareeyihii dekada Berbera xukuumadii mudane Daahir Riyaale. "**go'aanka Madaxweynuhu-Axmed Maxamed Siilaanyo- uu qaatay waa mid sax ah, isla markaana uu anigu intii aan xilka hayey waxaan kula taliyey in aanay dekaddu ka bixin gacanta Madaxtooyada.Haddii kale ay dhib badani ka iman doonto"** ayuu yidhi Cali Xoorxoor oon xil ka heyn dawlada SIilaayo,hase yeeshee shir jaraa'id ku qabtey gurigiisa ku yaala Berbera.Cali Xoorxoor oo sheegaya faa'idada ku jirta arintaa ayaa isagoo hadalka sii wata yidhi**: "Anigu dekedda sidaan u aqaanno iyo sida ay dad badani u yaqaanaan waa kala jaad, markaa tallaabada uu Madaxweynuhu qaaday waa mid haboon oo dhibaatadeeda iyo murrankeeda maanta ayaa u danbaynaysa , markaa hawsheeduna way yaraanaysaa, dadka ka shaqaynayana way u dhib yaraanaysaa."**

Shaqaalaha madaxtooyada ayaa waxay dib u shaandheeyeen erayadaa,waxaaney talo ku gooyeen si durdur ugu furmo madaxtooyada hala soo celiyo gaashaan qaadihiii xoolaha soo foofin jiray.Dadka reer Berbera ayaa farta qaniinay cod midaysana ku sheegay "Inaaney mudane Daahir Riyaale ka codayn ee kuwa ay ka codeeyeen uu hogaaminayey Cali Xoor Xoor"… Dantii ummada iyo dantii xukuumada ayaa is jiidhay.Tallana waxay ku soo gabagaboodey dadyohow faro aan dufan laheyn madaxtooyada la fadhiyi maynee, inoo raadiya raggii sida Cali Xoorxoor dhaqaalaha madaxtooyada ku soo shubi jiray. Waxaan shalay diiday maanta yeelay miyey marayaan reer KULMIYE.

Dawlada ay Kulmiye hogaaminayso ayaa waxaa ka dhamaadey xiisihii ay isku qabeen.Taliska ciidanka booliska ayaa dib loogu dhiibay hogaamiyihii Xilligii madaxweyne Riyaale.Wasiirka arimaha gudaha ayaa xisbiga UDUB laga soo dhex doortay.Arintu wali way socotaa ee isbadalkii uu Kulmiye ku baaqayey iyo dadkii musuqmaasuqa ka soo horjeeday halkey mareen??????????

Hogaanka sare ee UDUB ayaa arintan ku doogsadey. Cali Maxamed Waran-cadde ayaa yidhi "Madaxwaynaha waxaan ku hambalyeynayaa inuu dib ugu soo celiyey dekeda Maariyihii hore". Cali Xoor Xoor oo ka jawaabeyey in laga maarmi waayey iyo in kalena wuxuu yidhi: "Waxaan ku faraxsan nahay inay dekedda Berbera mar kale masuuliyadeeda dawladdu igu soo celiso,laygamana maarmi waayinee xilka waa la ii gartey".

Markii dhinac kasta laga eegay arintaa uu xisbigii Kulmiye hiil uga doonay raggii ugu dhibta badnaa musuqmaasuqna hormood ka ahaa waxay u eegtahay in rag tashadeen si ay taariikh xumo uga reebaan Siilaanyo. Markii la doortay Axmed Maxamed Siinaayo, qof waliba wuu ogaa inaanu mar danbe u sharaxneyn jagada madaxweynaha, hase yeeshee waxaa la is lahaa waxay noqon shan sanno oo taariikhda u gasha Siilaanyo, ummadana uga hiilisa cadaalad darada maxkamadaha dhex fadhida iyo musuqmaasuqa hadheeyey hay'adihii dawlada.

Waa ayaandaro u baahan in uu Madaxweynuhu dib ugu noqdo go'aamadan uu dhawaan gaadhey,una tudho aakhiradiisa iyo hantida ummada.Shalay dadkii musuqmaasuqa hogaaminayey ayaan badalayaa, maanatana kuwiibaan gargaar ka raadsanayaa KULMIYoow dadka ma qabato..

Tifatirka Mareegta Farshaxan
Somaliland@farshaxan.com